



Date: 16/10/2017  
Ref: XF/012/2017



التاريخ: 27 محرم 1439هـ

## Bayaan

(إِنَّا لِلَّهِ وَإِنَّا إِلَيْهِ رَاجِعُونَ)

الحمد لله رب العالمين والصلاة والسلام على رسوله الأمين وعلى آله وصحبه أجمعين ومن سار على نهجه واقتفى أثره إلى يوم الدين وبعد

- 1- Ururka Al-Ictisaam Bil Kitaabi Wassunnah waxa uu uga tacsiiyaynayaa dhamaan umadda Soomaaliyeed, musiibadii naxdinta lahayd ee ka dhacaday Sabtidi 24/muxaram/1439, 14/10/2017 Magaalada Moqdisho. Waxaanu Alle uga baryayaa naxariistii Janno inuu ka waraabiyo intii dhimatay cafiimaadna siiyo inta uu dhaawacu soo gaadhay.
- 2- Ururka Al-Ictisaam waxaa uu cambaaraynaya falka argagaxiso, iyo gumaadka loo gaystay shacabka soomaaliyeed ee ku nool magaalada Moqdisho, waxaanay ugu baaqaya Ganacsatada, madaxda dhaqanka, siyaasiyiinta iyo dhamaan haldoor ka umadda soomaaliyeed in ay gutaan kaalintooda kaga aadan arintan meel na looga soo wada jeesto cadawga.
- 3- Ururka Al-Ictsaam waxaa uu ugu baaqayaa dhamaan culimada soomaaliyeed inay soo saaraan baaqyo lagu cambaraynaayo dhacdadan foosha xun, una istaagaan wacyi galnta iyo abaabulka loogu gurmanaayo dadka ay musiibadu saamaysay.
- 4- Ururka Al-Ictsaam waxaa uu ugu baaqaya dawladda iyo shacabka Soomaaliyeed in loo gurmado, lana taakuleeyo dadki iyo ehaladii wax yeeladu ka soo gaadhay musiibada.

- 5- Ururka Al-Ictsaam waxaa uu ugu baaqaya jaaliyadda Soomaaliyeed ee ku dhaqan dalka dibaddiisa, gaarahaan maraakista islaamiga ah, in ay ka gaystaan kaalin laxaad leh gurmada.
- 6- Ururka Al-Ictisaam waxaa uu ugu baaqaya Dawladda Soomaaliyeed in lala xisaabtamo, sharcigana lahor keeno dhamaan cidkasta oo lug ku leh falkan fooshaxun, ama ka gaabisay in ay gudato waajibaadkii loo igmaday, sababtayna in dhibka intaas le, eg soo gaadho shacabka.

Alla Mahad Leh

Dr. Haruun Sheekh Xuseen

Gudoomiyaha Golaha Fulinta

Ururka Al-Ictisaam Bil Kitaabi Wassunnah.

27/Muxarram/1439

16/10/2017



Mogadishu - Somalia

Mobile: +252-612333798

Email: talowadaag17@googlegroups.com

Web: <http://ictisaam.net/>